Jamhuuriyadda Federaalka Somaaliya
Baarlamaanka Federaalka Somaaliya
Golaha Shacabka

Hadalqoraalka kalfadhiga-3-aad
Documentiga Kol-3aad F.5-aad/2013 **24/09/2013**

Kalfadhiga 3-aad

Kulankiisa 5-aad

Guntinta (courum): 161mps

Ajendaha:

1)Furitaanka aaayadaha Quraanka Kariimka

2)Ansixinta Ajendaha

3)Qeeybinta warqadaha kala ah

A)Heshiiskii (favori)garoonka aadad cabdule,labo warqadood

B)Codsi bixin guno bil dheeraad ah warqadii gudoonka

C)Dib u celin Hindise sharciyeed Duulista Rayidka iyo saadaasha hawada warqadii codsiga iyo jawaabta

D)Heshiiskii contonu

4)warbixinta gobalada

A)Gaddo,Aqriye Xil:C/naasir gaarane

6)Akhrinta Motion-ka tallo soo jeedinta wax kabadalid qodob ka mid ah xeer hoosaadka

Shir-gudoonka golaha M.ne Jeylaani nuur iikar

Waxaa maanta shirka furay guddoomiye k/x/1aad mudane jeylaani nuur iikar waxaa lagu furay aayadaha qur,aanka kariimka waxaana akhriyey xil:sheeq shaacir gudoomiyaha ayaa xildhibaanada weydiistay ansixinta ajandaha weyna ansixiyeen.

Guddoomiyaha ayaa yiri waxaan u gudbeynaa motion-ka la keenay,gudoomiyaha ayaa u yeeray xildhibanadii soo gudbiyey motionka si ay u akhriyaan.

Xil:Mahad max'ed salad: ayaa motionkii aqriyey isagoo si kooban u dul maray motionkii ay soo gudbiyeen xildhibaanada.

Guddoomiyaha waxaa kale oo uu sheegay in qodobka 84-aad ee xeer hoosaadka ee Golaha shacabka waxa uu leeyahay,waxaa motion wax looga badalaayo xeer hoosaadka soo jeedin kara ilaa iyo 10-xildhibaan haddii ay isku raacaan 50+1.

Xil:Bare ugaas:waxaan soo jeedin lahaa qofkii laga dhigayo wasiir , wasiir k/xigeen ama wasiiru dowle in uu keeno C.V-giisa si loo ogaado heerka ay aqoontiisa gaarsiisan tahay **.**

Xil:Baqdaadi:waxaan soo jeedinayaa in motionkaan uu yahay mid wanaagsan xildhibaanadii soo qorayna wey mahadsan yihiin haddii la yiraahdo mid mid aan u ansixino ama dhamaan aan wada ansixino taasi xildhibaanada ayaa xaq u leh waayo xildhibanada waxaa saaran masuuliyada shacabka awoodana waxaa iskaleh xubnaha baarlamanka

Xil:C/laahi goodax bare: waxaan soo jeedinayaa in baarlamankaan uu ka duwan yahay baarlamaanadii hore dalka u soo maray shacabka waxa uu gelinayaa hidadiilo oo kalasooni ay ku dheehantahay haddii 50-wasiir la keeno maalinba mid miyaan ansixineynaa taasi waa laga wanaagsan yahay xildhibaano motionka aan ansixino.

Xil:Qorax: waxaan soo jeedinayaa in motionkan la ansixiyo sidoo kalena la ansixiyaa sida janaraalada, agaasimayaasha,diblomaasiyiinta iyo cid walba oo wadanka xil ka qabaneyso.

Xil:cabdala Boos axmed:waxaan oran lahaa caalamka waxaa ka jira labo hab oo lagu dhaqmo sida in awooda dalka uu leeyahay madaxweynaha ama baarlamaanka,anaga waxaan nahay baarlamaan caalamkana kama jiro wasiir hal hal loo ansixiyo.

Xil:Shariif max'ed cabdalla: waxaan soo jeedinayaa haddii uu Ra'iisul wasaaraha soo magacaabo qof aan u qalmin wasiir ama wasiir ku xigeen waxey noqoneysaa in Ra'iisul-wasaaraha uu la yimid xil gudasho la,aan,taasina waxey ceeb ku tahay Ra'iisul-wasaaraha.

Xil:Xiis Muuse: Aniga aragtideyda waa ilaa iyo dowladii cabdi-qaasin wasiirada duuduub ayaa loo ansixin jiray hada waxaan soo jeedinayaa in mid mid loo ansixiyo, sidaasi ayeyna dowladnimada ku jirtaa.

Xil:Xeyd: waxaan laqabaa xildhibaanadii iga horeyey in mid mid loo ansixiyo wasiirada.

Xil:Cabdi ladhiif san yare: waxaan dhihi lahaa in laga gudbo waxa layiraahdo duruuf waayo waxa aan hadda nahay dowlad dhameystiran cidii lasoo magacaabo hala keeno C.V-gooda Rag iyo Dumarba si aan u ansixino.

Xil:Sheekh Aadan Madeer: aniga aragtideyda waxey tahay qoladii motionka kentay wey dadaaleen laakiin waxaa meesha ka maqan mudadii Ra'iisul-wasaaraha kusoo magacaabi lahaa golahiisa wasiirada kuna horkeeni lahaa golaha baarlamanka waxaan codsanayaa in hadda lagu daro xeer hoosaadka waayo kuma cadda.

Xil. Max'ed ismaaciil Shuuriye:wax walba waxey ku fiican yihiin in marka hore la isla eego guddina loo xilsaaro si ay u soo dhiraandhiriyaan**.**

Xil:Jamaal: Mudadii nala doortay ilaa iyo hadda shacabka dhaliil ayey inoo soojedinayaan haddaba waxaan soo jeedinayaa si dhaliishaas ay meesha uga baxdo aan ansixsino motionkaan**.**

Xil: Yaasiin cabdi seed: waxaan soo jeedinayaa maalintii la ansixiyey golaha waiirada ilaa iyo maanta waxa ay la daalaa dhacayaan shaqadooda waayo wasiir walba waxaa loo dhiibay shaqo uusan qaban Karin oo katan badan waxaana ka muuqda tacadiyo farabadan.

Xil:Cabdalla Xaaji cali: Ra'iisul-wasaaraha ayaan marka hore ansixineynaa kadibna wasiirada ayaan mid mid u ansixineynaa sidaasi ayaan soo jeedinayaa.

Xil:Xaaji cabdi: Marka sharci lasameynayo waxa uu u baahan yahay in dhinacyo badan laga fiiriyo aniga waxaan qabaa in motionkaan dib loo celiyo.

Xil:Ibraahin Ilkacase: waxaan soo jeedinayaa in marka hore xeer hoosaadka lasaxo markaas ayaa golaha wasiirada lala xisaabtami karaa.

Xil:Khaalid: aniga fikirkeyga waa in qofkasto oo lamagacaabayo waa in dadiisa ka yaraanin 30-sano iyo in uu heesto shahaado jamacadeed,sidoo kalane uu usoo shaqeyey hay'adaha dowlada mudo shan sano ah,wasaarad walbana waa in layiraahdaa maxaa idiin qabsoomay oo dib u eegis lagu sameyaa .

Xil:Dufle: waxaan u arkaa in motionkaan lagu tayeynayo golaha wasiirada waana muhiim.

Xil:Cabdulaahi sheikh ismaaciil:waxaan soo jeedinayaa xildhibaanadii soo diyaariyey motoinkaan ay ogaadaan in aan ku jirno qaran dhis motionkaana aan hadda loo baahneyn maalin walba in qaran la dumiyo ma wanaagsana.

Guddoomiyaha: ayaa yiri saakay waxa uu ku furmay 161-xildhibaan haddana waxaa xaadir ah 107-xildhibaan sidaas awgeyd ma codeyn karno berito ayaan motionkaan aan dhameystiri doonaa.

Intaa kadib Guddoomiye mudane jelaani nuur iikar ayaa ku dhawaaqay in uu shirka xiran yahay saacada marka ay aheyd 12:45.